



Degaanka nololwanaagga ee Vantaa iyo Kerava  
Waaxda kahortagga cudurrada faafa iyo caabuqa

## Hagis loogu talaggalay qofka ay cadhadu (isnadaamiska) ku dhacday ama u nuglaaday, oo qof cadho qaba la kulmay

Cadhada ama isnadaamiska oo afka qalaad loo yaqaan scabies waa cambaar jir cuncun leh, waxaana keenta shillinta nooca la yiraahdo (*Sarcoptes scabiei*). Cuncunka cadhadu waxaa uu inta badan bilowdaa 3–6 toddobaad gudahood laga soo bilaabo marka qofku uu cudurka ku dhaco. Faafista cudurka waxaa ku filan oo keliya hal shillin oo dheddig ah, laakiin gacanta oo la isku salaamo ama is taabasho kale oo muddo gaaban ah, inta badan kuma filna in shillintu ay qofkii qabay ka soo wareegto oo qofka kale u gudubto. Cadhada waxaa kaloo laga qaadi karaa dharka iyo go'yaasha sariirta ee qofka qaba cadhada, waayo shillinta dheddig waxaa ay jirka bannaankiisa ku noolaan kartaa muddo afar iyo labaatan saacadood -24 saacad iyo bar ah, laakiin qaabkaan cudur faafista ah waa mid aad u dhif ah.

Haddii aad ka shakisan tahay in cadho kugu dhacday, ama aad isku aragto astaamaha cadhada, waa in aad dhakhtarka u tagtaa, si cudurka loo baaro oo aqoonsi loogu sameeyo. Aqoonsiga cadhadu wuxuu noqon karaa mid aad u adag, waayo waxaa dhici karta in astaamaha cadhadu ay noqdaan kuwo aan sugnayn

Haddii ilmahaaga lagu sheego in uu qabo cadho, waxaad arrinkaan u sheegtaa shaqaalahaa xannaanada ama macallinka fasalka.

### Astaamaha cadhada

- Cuncun, gaar ahaan fiidkii iyo habeenkii. Astaamaha waxaa ay ka soo muuqdaan ama laga dareemaa faraha dhexdooda, agagaarka barida ama dabada, iyo curcurta gacanta (meesha saacadda lagu xiro).
- Jirka waxaa ka soo baxa finan aad u tira badan, bacoollo ama xalxal biyo leh (vesirakkula) iyo raad ama calaamad isxoqitaan.
- Shillinta dheddigga ah waxaa ay gashaa ama isticmaashaa laalaabyada curcurta iyo faraha dhexdooda, Ilmahana waxay ka gashaa ama ka isticmaashaa calaacasha iyo cagta cad.

### Daryeelka cadhada

Farmashiyaha waxaa laga helayaa kareemka jirka oo ay ku jирто maaddada permetriiniä (NIX® emulsivoide), taasoo aan u baahnayn waraaqda dhakhtarka. Hal tiyuub oo kareemkaas ah ayaa ku filan qofka weyn, ilmaha inta la marinaayo waa ay ka yar tahay inta dadka waawayn, waxayna ku xiran tahay hadba da'da ilmuhi inta ay le'egtahay. Habeenkii marka la soo qubaysto kaddib ayaa kareemka la marinaya jirka oo dhan, laga soo bilaabo qoorta illaa iyo hoos, xittaa waxaa la marinaya xubinka taranka, faraha gacmaha dhexdooda iyo faraha lugaha. Sidoo kale timaha iyo wajiga waa la daryelaya, haddii ay leeyihii astaamihii cadhada. Xuub-xabeedka (limakalvo) kareemka lama marinaayo. Jirka waxaa subaxdii loo mayrayaa si taxaddar leh. Daryeelkaan daaweynta ah waxaa lagu celcelinaya 7–10 maamoon gudahood ah.

Waxaa sidoo kale dhici karta in dhakhtarku uu qoro kiniini daawo ahaan ah, oo loogu talaggalay daryeelka cadhada, ama kareem kale oo salfar ah oo si gaar ah farmashiyaha loogu diyaarinaayo. Xitaa daawada kiniiniga ah waxaa lagu celcelinaya muddo toddobaad ah.

Qofka uu ku dhacay xanuunka cadhada, waxaa uu ku laaban karaa xannaanada/iskuulka/shaqada, maalinka xigta marka uu hal mar daawada isticmaalo.

Si kasta oo loogu guulaysto daryeelka cadhada, haddana cuncunka waxaa uu sii socon karaa muddo dhowr toddobaad ah, sidaas awgeed xilligaas ku dadaal inaad si wanaagsan kareemka u isticmaasho, bilowga hore waxaad isticmaashaa, tusaale ahaan kareemka ay ku jirto maaddada (mentholispri), kaddibna waxaad isticmaashaa kareemka jirka oo dhan qoynaaya. Sidoo kale waxaa cuncunka lagu khafiifin karaa kareemka kortisooniga ah, kaasoo laga heli karo farmashiyaha iyadoo aan loo baahan waraaqda dhakhtarka. Haddii cuncunku uu sii socdo in kabadan 3 toddobaad, waa in aad markas dhakhtarka la xiriirtaa.

Daryeelka qofka u nuglaaday cadhada (qofka la kulmay qof qaba cadhada)

U nuglaanta waxaa loola jeedaa dadka isla guriga kula nool qofka qaba cadhada, ama isku sariirta ay seexdeen (tusaale ahaan. carruurta iyo dhallinyarada isa soo booqday oo habeenkii isku meel ku hoyday), dadka waqtii badan oo xiriir dhow ah la isla qaatay (tusaale ahaan saaxiibbada, iyo carruurta saaxiibbada ah ee wada ciyara) iyo dadka uu dhexmaray xiriirka isu gal moodka. Dadka isku guriga ku nool, dadka isku sariirta wada seexday iyo kuwa xirirk gal moodku uu dhexmaray, waxaa la daryeelayaama la daaweynayaa laba goor oo markiiba ah 7–10 maalmood. Dadka kale ee u nuglaaday waxaa ku filan hal mar oo daryeel ah. Daryeelka daaweynta waa in sida suurtaggalka ah la sameeyaa isku mar.

Xaaladda uu xanuunku yahay mid safmar ah, tusaale ahaan xaaland safmar ah oo kooxda xannaanada ama fasallada iskuulka ah, dhakhtarka qaabilsan cudurrada faafa ee safamrk ah ayaa caddaynayaa dadka u nuglaaday. Sidoo kale waa in iskumar uu dhaca daryeelka dadka ka tirsan kooxda xannaanada iyo fasallada iskuulka ee u nuglaaday xanuunka cadhada.

Nadaafadda la samaynaayo maalinka ku xigta daryeelka daawada kaddib

- u isticmaal nadaafadda, gacangashiga ama goloofisyda halka mar la isticmaalo
- gogosha sariirta ku beddel kuwo nadiif ah
- waxaad huufaraysaa joodariga, kuraasta fadhiga, katiifadda iyo maryaha la dulsaaro kuraasta
- layri ama huufaree bustaha iyo barkimaha
- beddel dharka oo dhan
- layri oo ha isticmaalin maryaha kuraasta la saaro muddo dhan 2-3 habeen iyo maalmood
- fiirogaar ah u yeelo sidoo kale gacangashiga (kuwa faraha leh iyo kuwa caadiga ah) ee la isticmaalaayay muddo saddex maalmood ah
- beddel shukumaannada ama tuwaallada
- dharka, go'yaasha sariiraha iyo boombalooyinka jilicsan ee ilmuuhu ku ciyaraan, waxaad ku dhaqdaa darajada 60 ee makiinadda dharka lagu dhaqo, waxaad sida ugu suuraggalsan ku qallajisaa makiinadda qallajinta, ama bannaanka ku war oo ku soo leyri, ama waxaad ku xirtaa bac muddo saddex maalmood iyo saddex habeen ah, ama waxaad gelisaa qaboojiyaha / bannaanka oo darajada qabowgu ay tahay (-20 °C ama ka sii qaboow) muddo hal habeen iyo hal maalin ah.

Nadaafadda waa lagu soo celinayaa marka la samaynaayo daryeelka labaad ee daaweynta.